

Fayraska Human papillomavirus HPV iyo tallaalka HPV

Waa maxay HPV?

HPV waa fayras marar badan dadka ku dhaca.

HPV-ga waxaa la kala qaadi karaa marka maqaarka xubnaha taranka ay is taabtaan ayadoo galmo la sameynayo.

Inta badan dadka galmada sameeya waa uu ku dhici doonaa infekshanka HPV mar un noloshooda.

HPV-gu wuxuu saameyn ku yeelan karaa dadka oo dhan jinsiyadeey doonaan ha ahaadaanee.

Fayraska HPV badanaa malaha calaamado lagu garan karo jirka ayaana si dabiici ah ugu dambeyn u saari doono.


Mararka qaar laakiin haddii uusan jirku iskiis meesha uga saarin fayraska, HPV wuxuu keeni karaa xanuunno ay ka mid yihiin kansarka.

Waxaad qaadi kartaa HPV:

- marka ugu horreysa ee aad galmo sameyso
- Haddii aad ku jirto xiriir u dhexeeya laba qof oo keliya
- Haddii aadan muddo dheer samaynin galmo.

Tallaalka HPV wuxuu kaa difaaca:

- In ka badan 90% kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka
- Inta badan kansarrada kale ee lala xiriiriyo HPV, sida kansarka futada, guska, siilka, farjiga iyo cunaha
- finanka xubnaha taranka.



Yaa qaadanaya tallaalka HPV?

Tallaalka HPV waxaa lagula talinayaa qof kasta oo ay da'diisu u dhaxayso 9 ilaa 25 sano, kuna nool Australia.

Tallaalka HPV waxaa sidoo kale lagula talinayaa dadka halista sare ugu jira inay qaadaan cudurrada la xiriira HPV, sida dadka la nool HIV-ga, dadka nidaamkooda difaaca jirku uu aad u liito, iyo ragga galmada la sameeya ragga kale.

Tallaalka HPV ma lacag la'aan baa?

Tallaalka HPV-ga waa u lacag la'aan dadka ay da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 25 sano, sida ku qeexan Barnaamijka Qaranka ee Tallaalka.

Inkasta oo tallaalka HPV uu lacag la'aan yahay, haddana waxaa laga yaabaa in lacag lagaaga qaado ballanta wax laguugu sharaxayo. La xiriir adeeg-bixiyaha ku tallaali doona. Haddii aad ka weyn tahay 25 sano, ama aadan haysan kaarka Medicare-ka, waxaa laga yaabaa in loo baahan yahay inaad bixiso kharashka tallaalka HPV.

Xaggee ayaan ka heli karaa tallaalka HPV-ga?

Carruurta Australia ee da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 13 sano ayaa iskuulka ku qaadan kara tallaalka HPV taas oo ah adeeg lacag la'aan ah oo ay bixinayaan golaha deegaanku.

Waxaad sidoo kale tallaalka HPV ka heli kartaa xarunta dhakhtarka, goobta tallaalka ee deegaankaaga iyo qaar ka mid ah farmashiyeyaasha.

Immisa qaadasho oo tallaalka ah ayaa loo baahan yahay?

Dadka badankoodu waxay u baahan doonaan hal qaadasho oo tallaalka HPV ah oo keliya. Dadka difaaca jirkoodu uu wiiqmay ayaa laga yaabaa inay u baahdaan saddex qaadasho, oo la bixiyo muddo qiyaastii lix bilood ah.

Ka waran haddii aan seegay tallaalka HPV?

Haddii adiga ama ilmahaagu aad seegteen tallaalka, waxaad heli kartaan fursad aad ku heli qaadan kartaan tallaalka oo lacag la'aan ah ilaa inta ay da'daadu ka gaareyso 25 sano adoo ka

helaya adeegga tallaalka ee golaha deegaanka, dhakhtar, ama farmashiyeyaalka qaarkood.

Sidee baan ku ogaan karaa inaan qaatay tallaalka HPV-ga?

Tallaallada HPV-ga waxaa lagu diiwaangeliyaa Diiwaanka Tallaalada ee Australia (Australian Immunisation Register - AIR). Waxaad diiwaanka tallaaladii aad hore u soo qaadatay ka heli kartaa akoonkaaga Medicare-ka ee internetka (iyada oo loo marayo MyGov), ama waxaad ka codsan kartaa dhakhtarkaaga ama adeeg-bixiyaha tallaalka inay kuu hubiyaan.

Waxaad u baahan tahay inaad si joogto ah u sameyso baaritaannada lagu ogaan karo cudurada ku dhaca afka ilmo-galeenka, xitaa haddii aad qaadatay tallaalka HPV

Tallaalka HPV kaama difaacayo dhamaan noocyada fayraska HPV ee sababi kara kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka.

Baaritaanka lagu eego afka ilmo-galeenka (Cervical Screening Test) jiritaanka HPV wuxuuna muujin karaa dadka khatarta ugu jira inuu ku dhaco kansarka afka ilmo-galeenka.

Waxaad u baahan tahay inaad samayso baaritaanka lagu baarayo kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka shantii sanaba mar haddii aad tahay:

- haweeney ama qof leh afka ilmo-galeenka
- qof ay da'deedu u dhaxayso 25 iyo 74 sano jir, iyo
- qof galmo **lasoo** sameeyay qof kale rag iyo dumar wuxuu doono ha ahaadee.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo: www.cancervic.org.au/cervical

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan tallaalka HPV, kala hadal dhakhtarkaaga ama adeegga tallaalka ee deegaankaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan HPV iyo tallaalka HPV, booqo hpvvaccine.org.au